DEPARTMENT OF HEALTH

# Xuquuqda Bukaanka ee Daryeelka Dhamaadka Nolosha Hospice (Minnesota iyo Federaalka – Isku-darka)

### XUQUUQDA DARYEELKA DHAMAADKA NOLOSHA HOSPICE EE MINNES SIDA KU CAD XEERKA MINNESOTA 144A.751

## Fasiraadda iyo Dhaqan-gelinta Xuquuqda

Xuquuqaha ku xusan qaybtan waxaa loo dejiyey si ay uga faa'iideystaan shakhsiyaadka hela Daryeelka Hospice **(**daryeelka dhammaadka nolosha**)**. Bixiye daryeel hospice ah ma qasbi karo qof inuu ka tanaasulo xuquuqahan shardi ahaan si uu u helo Daryeelka Hospice (daryeelka dhammaadka nolosha). Mas'uul sharciyeed (guardian) ama wakiil maamul (conservator), ama marka uusan jirin mas'uul ama wakiil noocaas ah, qof loo magacaabay ayaa raadsan kara dhaqan-gelinta xuquuqahan. Bayaankan xuquuqda ma beddelayo mana dhimayo xuquuq kale ama xorriyado kale oo jiri kara oo la xiriira dadka hela Daryeelka Hospice (daryeelka dhammaadka nolosha), dadka bixiya Daryeelka Hospice (daryeelka dhammaadka nolosha), ama bixiyeyaasha Daryeelka Hospice (daryeelka dhammaadka nolosha) ee shatiyeysan sida ku cad Xeerka Minnesota, qodobka 144A.753 Licensure (https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144A.753).

## Bayaanka Xuquuqda

Qoraalka ku qoran xarfo madow **(bold)** wuxuu matalaa xuquuq dheeraad ah oo macaamiisha ah oo uu dhigayo sharciga federaalka, kuwaas oo quseeya bukaannada helaya Daryeelka Dhamaadka Nolosha ee hay'adaha shahaado ka haysta Medicare.

Xeerka Minnesota Statutes, qaybta 144A.751 Hospice Bill of Rights (https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144A.751)

Qofka qaata Daryeelka Dhamaadka Nolosha waxa uu xaq u leeyahay inuu:

**Lagu wargeliyo xuquuqdiisa, isla markaana hay'adda bixisa Daryeelka Dhamaadka Nolosha ay waajib ku tahay inay ilaaliso oo kor u qaaddo ku-dhaqanka xuquuqdaas.**

1. Ku-dhaqanka **xuquuqda bukaanka ee Daryeelka Dhammaadka Nolosha**. Bukaanka waxa uu xaq u leeyahay inuu ku dhaqmo xuquuqdiisa isagoo ah qof qaata Daryeelka Dhammaadka Nolosha. Bukaanka waxa kale oo uu xaq u leeyahay inuu helo macluumaad qoraal ah oo ku saabsan xuquuqdiisa ka hor inta aan la bilaabin Daryeelka Dhammaadka Nolosha, ama inta lagu jiro booqashada qiimaynta hore ka hor bilowga daryeelka, oo ay ku jirto waxa la sameeyo haddii xuquuqdiisa la jabiyo. **Ogeysiiska xuquuqda iyo waajibaadka: (1) Inta lagu jiro booqashada qiimaynta hore, ka hor inta aan la bixin daryeelka, hay'adda bixisa Daryeelka Dhammaadka Nolosha waa inay siisaa bukaanka ama wakiilkiisa ogeeysiin af ahaan (hadal) iyo qoraal ah oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka bukaanka, kuna bixinaysa luuqad iyo hab uu bukaanka fahmi karo; (2) Hay'adda bixisa Daryeelka Dhammaadka Nolosha waa inay u hoggaansantaa shuruudaha ku xusan Qayb-hoosaadka I**

**ee Qodobka 489 ee Xeerarka Federaalka (Code of Federal Regulations – CFR) ee cutubkan, kuwaas oo la xiriira tilmaamaha hore (advance directives). Hay'adda waa inay bukaanka ku wargelisaa isla markaana u qaybisaa macluumaad qoraal ah oo ku saabsan siyaasaddeeda la xiriirta tilmaamaha hore, oo ay ku jirto sharraxaad ku saabsan sharciga gobolka ee khuseeya; (3) Hay'adda bixisa Daryeelka Dhammaadka Nolosha waa inay ka heshaa bukaanka ama wakiilkiisa saxiix caddeynaya in uu helay nuqul ka mid ah ogeysiiska xuquuqda iyo waajibaadka.**

2. Hel daryeel iyo adeegyo ku salaysan heerarka daryeelka dhammaadka nolosha ugu habboon ee la ogol yahay iyo inaad si firfircoon uga qayb qaadato abuurista iyo beddelka qorshaha iyo qiimeynta daryeelka iyo adeegyada. **Ka qayb qaado horumarinta qorshahaaga daryeelka dhammaadka nolosha.**
3. In bukaanka horay loogu wargeliyo, ka hor inta uusan helin daryeelka, adeegyada la siin doono, noocyada xirfadlayaasha bixin doona daryeelka, inta jeer ee booqashooyinka la qorsheeyay, doorashooyinka kale ee jira, iyo cawaaqibka ka dhalan kara doorashooyinkaas, oo ay ku jiraan cawaaqibka ka iman kara diidmada adeegyadaas.
4. In bukaanka horay loogu wargeliyo, markasta oo ay suurtagal tahay, isbeddel kasta oo ku yimaadda qorshaha daryeelka Daryeelka Dhammaadka Nolosha, isla markaana uu si firfircoon uga qayb qaato isbeddel kasta.
5. In bukaanka diidi karo daryeel, adeegyo ama daawayn.
6. In bukaanka horay u ogaado xaddidaadaha adeegyada uu bixiyo bixiyaha, iyo sababaha bixiyaha ugu joojin karo adeegyada**. In bukaanka helo macluumaad ku saabsan baaxadda adeegyada ay bixin doonto hay'adda Daryeelka Dhamaadka Nolosha iyo xaddidaadaha gaarka ah ee adeegyadaas.**
7. In bukaanka horay u ogaado, ka hor inta uusan helin daryeelka, in adeegyada Daryeelka Dhammaadka Nolosha ay dabooli karaan caymiska caafimaadka, gargaar caafimaad, Medicare, ama barnaamijyo kale oo caafimaad oo uu ku jiro. In bukaanka helo macluumaad ku saabsan adeegyada lagu daboolo faa'iidada Daryeelka Dhamaadka Nolosha.
8. In bukaanka helo, marka uu codsado, qiyaas daacad ah oo ku saabsan lacagta magdhawga ah ee bixiyuhu ka filayo inuu ka helo shirkadda qorshaha caymiska caafimaadka ee uu bukaanku ku jiro. Qiyaas daacad ah waa in sidoo kale.
9. In bukaanka ogaado inay jiri karaan adeegyo kale oo bulshada dhexdeeda laga heli karo, oo ay ku jiraan adeegyada kale ee Daryeelka Dhamaadka Nolosha iyo bixiyeyaasha kale ee Daryeelka Dhamaadka Nolosha, isla markaana uu ogaado meesha laga heli karo macluumaad ku saabsan adeegyadaas.
10. In bukaanka si xor ah u doorto bixiyeyaasha jira, isla markaana uu beddeli karo bixiyaha ka dib marka adeegyada la bilaabo, iyadoo la tixraacayo xaddidaadaha caymiska caafimaadka, gargaar caafimaad, Medicare, ama barnaamijyada kale ee caafimaad. **In bukaanka doorto dhakhtarkiisa masuulka ka ah daryeelkiisa.**

**11.** In macluumaadka shakhsiga ah, maaliyadeed, iyo caafimaad ee bukaanka la ilaaliyo oo loo daayo qarsoodi, isla markaana bukaanka lala socodsiiyo siyaasadaha iyo habraacyada bixiyaha ee la xiriira shaacinta macluumaadkaas.

**12.** In bukaanka loo oggolaado inuu helo hab uu ku galo diiwaannada iyo macluumaadka qoraalka ahee ku jira diiwaannada, sida ku cad qodobbada 144.291 ilaa 144.298**. In bukaanka yeesho diiwaan caafimaad oo qarsoodi ah. Helitaanka ama sii-deynta macluumaadka bukaanka iyo diiwaannada caafimaadka waa la oggol yahay oo keliya iyadoo la raacayo qodobbada 45 CFR qaybaha 160 iyo 164.**

**13.** In bukaanka u adeegaan dad si fiican loo tababaray oo leh karti ay ku gutaan waajibaadkooda.

**14.** In bukaanka loola dhaqmo si edeb leh oo ixtiraam leh, isla markaana hantida bukaanka loola dhaqmo si ixtiraam leh. In qofka bukaanka ah iyo hantidiisaba loola dhaqmo si ixtiraam leh.

**15.** In bukaanka cabasho ka dhiiban karo daryeelka ama daawaynta la bixiyay ama aan la bixin, ama ku saabsan edebdarro ama ixtiraam la'aan loo muujiyay bukaanka ama hantida bukaanka, **qof kasta oo adeeg bixinaya isagoo ku hadlaya magaca Daryeelka Dhamaadka Nolosha. Bukaanka waxa uu xaq u leeyahay inaan lagu takoorin ama aan lagula kicin ciqaab ama aargoosi sabab la xiriirta ku-dhaqanka xuquuqdiisa.**

**16.** In bukaanka ka xoroobo xadgudub jireed iyo mid afka ah. **Kana xoroobo si-xun ula-dhaqan, dayacaad, ama xadgudub af, maskaxeed, galmo, iyo jireed, oo ay ku jiraan dhaawacyo aan la garanayn halka ay ka yimaadeen, iyo ku-takrifalka ama si khaldan u isticmaalka hantida bukaanka.**

**17.** In bukaanka helo ogeysiis macquul ah oo hore oo ku saabsan isbeddellada adeegyada ama khidmadaha, oo ay ku jirto ugu yaraan toban maalmood oo ogeysiis hore ah marka bixiyuhu joojinayo adeeg, marka laga reebo xaaladaha soo socda:

a. marka qaataha adeeggauu ku dhaqmo si beddela shuruudaha shaqo ee u dhexeeya bixiyaha Daryeelka Dhamaadka Nolosha iyo shaqsiga bixiya adeegyada, ama uu abuuro jawi shaqo oo aflagaaddo ah ama aan ammaan ahayn shaqsiga bixiya adeegyada. ama aan ammaan ahayn shaqsiga bixiya adeegyada.

b. marka ay timaaddo xaalad degdeg ah oo ku saabsan daryeel-bixiyaha aan rasmiga ahayn ama isbeddel weyn oo ku yimaadda xaaladda qaataha adeegga, taas oo keenta baahiyo adeeg oo ka badan heshiiska adeeg-bixiyaha ee hadda jira, isla markaana aan si ammaan ah loogu dabooli karin bixiyaha Daryeelka Dhammaadka Nolosha.

c. marka qaataha adeegga loo aqoonsaneyn in xaaladiisa aad u cuslatahay una dhoweyn dhimasho.

**18.** In bukaanka helo wareejin nidaamsan marka uu dhici doono isbeddel ku yimaadda bixiyaha adeegyada.

**19.** In bukaanka ogaado sida loola xiriiro qof ka tirsan bixiyaha oo mas'uul ka ah maaraynta dhibaatooyinka, isla markaana uu helo in bixiyuhu baaro oo isku dayo inuu xalliyo cabashada ama dacwadda.

**20.** In bukaanka ogaado magaca iyo cinwaanka hay'adda gobolka ama degmada ee lala xiriiri karo si loo helo macluumaad ama gargaar dheeraad ah.

**21.** In bukaanka ku dhaqmo xuquuqdan naftiisa, ama in qoyska bukaanka ee qaata Daryeelka Dhamaadka Nolosha ay ku dhaqmaan marka bukaanka lagu go'aamiyo inuusan awood u lahayn, iyada oo aan lagu kicin aargoosi ama ciqaab. **Haddii bukaanka maxkamad awood leh oo waafaqsan sharciga gobolka ay ku go'aamiso inuusan awood u lahayn, xuquuqda bukaanka waxa ku dhaqmaya qofka loo magacaabay si waafaqsan sharciga gobolka inuu ku matalo bukaanka. Haddii maxkamad goboleed aysan go'aamin in bukaanka aanu awood u lahayn, wakiil sharci ah oo uu bukaanka u magacaabay si waafaqsan sharciga gobolka ayaa ku dhaqmi kara xuquuqda bukaanka inta uu sharcigu oggol yahay.**

**22.** In xanuunka iyo astaamaha bukaanka loo maareeyo heerka raaxada ee uu bukaanku doorbido, oo ay ku jirto hubinta in daawooyinka ku habboon si fudud loogu heli karo bukaanka. **In bukaanka ka helo Daryeelka Dhamaadka Nolosha maarayn wax-ku-ool ah oo xanuunka iyo xakamaynta astaamaha la xiriira cudurka dhimashada dhow.**

**23.** In bukaanka ka laaban karo doorashada Daryeelka Dhamaadka Nolosha wakhti kasta.

**24.** In bukaanka helo daawayn bogsiin ah oo ku saabsan xaalad kasta oo aan la xiriirin cudurka keenay inuu buuxiyo shuruudaha daryeelka Dhammaadka Nolosha, iyadoo lala kaashanayo bixiyaha Daryeelka Dhamaadka Nolosha haddii ay suurtogal tahay, isla markaana bukaanka uu sii wato doorashada Daryeelka Dhamaadka Nolosha.

**Hay'adda bixisa Daryeelka Dhamaadka Nolosha waa inay:**

- **Hubisaa in dhammaan eedeymaha la xiriira si-xun ula-dhaqan, dayacaad, ama xadgudub af, maskaxeed, galmo, iyo jireed, oo ay ku jiraan dhaawacyo aan la garanayn halka ay ka yimaadeen, iyo ku-takrifalka ama si khaldan u isticmaalka hantida bukaanka, kuwaas oo ay fuliyaan qof kasta oo adeeg bixinaya isagoo ku hadlaya magaca Daryeelka Dhamaadka Nolosha, si degdeg ah u soo sheegaan shaqaalaha hay'adda iyo shaqaalaha qandaraaska ku shaqeeya maamulaha hay'adda Daryeelka Dhamaadka Nolosha.**
- **Si degdeg ah u baarto dhammaan eedeymaha la xiriira qof kasta oo adeeg bixinaya isagoo ku hadlaya magaca Daryeelka Dhamaadka Nolosha, isla markaana qaado tallaabooyin degdeg ah si looga hortago xadgudubyo kale oo suurtogal ah inta lagu jiro xaqiijinta eedeynta. Baaritaannada iyo/ama dukumeentiyada la xiriira dhammaan eedeymaha waa in lagu sameeyaa si waafaqsan habraacyada la dejiyay.**
- **Qaado tallaabooyin sixid ah oo ku habboon si waafaqsan sharciga gobolka, haddii eedeynta la xaqiijiyo, ha ahaato mid ay xaqiijisay maamulka hay'adda Daryeelka Dhamaadka Nolosha ama hay'ad kale oo awood sharciyeed leh, sida hay'adda baarista ee gobolka ama hay'adaha ammaanka ee deegaanka.**

- **Hubisaa in xadgudubyada la xaqiijiyay loo soo sheego hay'adaha gobolka iyo kuwa deegaanka ee awoodda u leh (oo ay ku jirto hay'adda gobolka ee baarista iyo shahaado-siinta) shan maalmood oo shaqo gudahood laga bilaabo marka la ogaado xadgudubka.**

Haddii bixiyaha Daryeelka Dhamaadka Nolosha uu maamulo xarun deegaan oo Daryeelka Dhamaadka Nolosha ah, ogeysiiska qoraalka ah ee la siinayo bukaanka kasta oo ku nool xaruntaas waa inuu ka mid noqdaa tirada iyo shahaadooyinka shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha joogtada ah iyo mutadawiciinta, ee uu bixiyuhu u shaqaaleysiiyay si ay u buuxiyaan shuruudaha Xeerka Minnesota Rule 4664.0390, wareeg kasta (shift) oo ka jira xarunta Daryeelka Dhamaadka Nolosha ee deegaan ahaan loo maamulo.

## Shaacinta

**Nuqul ka mid ah xuquuqdan waa in la siiyaa bukaanka marka la bilaabayo Daryeelka Dhamaadka Nolosha. Nuqulkaasi waa inuu ka koobnaadaa cinwaanka iyo lambarka taleefanka ee Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka iyo Xafiiska Difaaca Xuquuqda Daryeelka Mudada Dheer, iyo bayaan kooban oo sharaxaya sida cabasho loogu gudbiyo xafiisyadan. Macluumaadka ku saabsan sida loola xiriiro Xafiiska Difaaca Xuquuqda Daryeelka Mudada Dheer waa in lagu daraa ogeysiisyada isbeddelka khidmadaha bixiyaha iyo ogeysiisyada ay bixiyeyaasha Daryeelka Dhamaadka Nolosha bilaabayaan wareejinta ama joojinta adeegyada.**

## Ilooyin

Haddii aad qabto cabasho ku saabsan hay'adda ama qofka ku siinaya adeegyada Daryeelka Dhamaadka Nolosha, waxaad wici kartaa, u qori kartaa, ama booqan kartaa Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka, Waaxda Caafimaadka Minnesota, ama Xarunta Warbixinta Xadgudubka Dadka Waaweyn ee Minnesota. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Xafiiska Difaaca Xuquuqda Daryeelka Mudada Dheer.

**Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka (Office of Health Facility Complaints)**
651-201-4200/1-800-369-7994
health.ohfc-complaints@state.mn.us
Cinwaanka Boostada:
Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
P.O. Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970

**Xarunta Warbixinta Xadgudubka Dadka Waaweyn ee Minnesota (Minnesota Adult Abuse Reporting Center – MAARC)**
1-844-880-1574
Ilaalinta dadka waaweyn / Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota
Minnesota's Adult Protective Services (https://mn.gov/dhs/people-we-serve/seniors/services/adult-protection/)

**Xafiiska Difaaca Xuquuqda Daryeelka Mudada Dheer (Office of Ombudsman for Long-Term Care)**
PO Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971
1-800-657-3591 or 651-431-2555 (metro)
Office of Ombudsman for Long-Term Care (https://mn.gov/ooltc/)
MBA.OOLTC@state.mn.us

**Hay'adda Horumarinta Tayada Daryeelka ee Ku Saleysan Bukaanada Medicare iyo Qoysaskooda**
**(Medicare Beneficiary and Family Centered Care – Quality Improvement Organization**
LIVANTA LLC
Barnaamijka BFCC-QIO
10820 Guilford Road, Suite 202
Annapolis Junction, MD 20701-1105
1-888-524-9900, TTY 1-888-985-8775

Minnesota Department of Health
Qaybta Xakamaynta iyo Nidaaminta Caafimaadka (Health Regulation Division)
PO Box 64900
St. Paul, MN 55164-0900
651-201-4200
health.fpc-licensing@state.mn.us
www.health.state.mn.us

12/12/2025

*Si macluumaadkan loogu helo qaab kale, fadlan wac: 651-201-4200.*